



Mudane/Marwo (title and first and second),  
Homes Victoria waxay qoraalkaan kuugu soo diraysaa inay kugula wadaagto warar muhiim ah oo ku saabsan gurigaaga iyo marxaladda xigta ee Mashruuca Dhismaha Weyn.

Bishii Sebtembar ee sanadkii 2023, dawladda Victoria waxay ku dhawaaqday barnaamij dib-u-horumarineed oo weyn si ay dib ugu dhisto 44 daarood oo dhaadheer iyagoona laga dhigayo kuwo casri ah, si sahlan lagu geli karo, oo tamar wanaagsan leh. Tani waa qayb ka mid ah ballanqaadkeenna ah inaan bulshada reer Victoria siino guryo ka tiro badan kana wanaagsan kuwii hore.

Maanta, waxaan ku wargelineynaa kireystayaasha ku sugan 139 Highett Street, Richmond iyo 259 Malvern Road, South Yarra in howsha raritaankooda ay dhawaan bilaaban doonto iyadoo dib-u-dejinatana la dhameystirayo Febraayo 2026. Tani waxay suurtagelin doontaa dib u dhiska dhismayaashan dhaadheer si loo dhiso guryo badan oo kana wanaagsan kuwii hore.

### **Waxa ay tani adiga kaaga dhigan tahay**

Wada hadalada lagu qorsheynayo guuritaanka waxay bilaabmi doonaan dhawaan, si ay guuristaadu u dhacdo ilaa Febraayo 2026.

Waxaan fahamsanahay in tani ay tahay war weyn, shaqaalahayaga guriyeynta maxalliga ah ee u heellan iyo kooxda dib-u-dejinta ayaa halkan u jooga inay kaa taageeraan tallaabo kasta oo aad qaadeyso.

Hadda, waad is diiwaangelin kartaa si aad u hesho ballan fool-ka-fool ah si aad uga hadasho tallaabooyinka xiga iyo sida ugu wanaagsan ee aan kuu taageeri karno, iyo sidoo kale in aad wax badan ka ogaato barnaamijka dib u dhiska adigoo booqanaya [bigousingbuild.homes.vic.gov.au](http://bigousingbuild.homes.vic.gov.au) ama wac 1800 716 866.



Dhismayaasha cusub ee laga dhiso agagaarka 147 - 161 Elizabeth Street, Richmond waxay keeni doonaan guryo bulsho oo si wanaagsan loo qaabeeyey, badbaado leh, ammaan ah isla markaasna casriyeysan. Tani waxay noqon kartaa mid ka mid ah fursadaha dib-udejineed ee kuu furan.

Waxa kale oo aad la hadli kartaa xafiiska guriyeynta ee degaankaaga, iman kartaa kal-fadhi macluumaad, ama waxaad ballan la'aan tagi kartaa xarunta dib u dejinta marka laga furo xaafadaada agteeda, dhawaan.

## Sida aan kuu taageeri doono

Waxaan rabnaa in aan ku xaqiijino in ay naga go'an tahay in aan guuritaankaaga ka dhigno mid sahlan oo u dhacda sida ugu macquulsan. Waa kuwan waxa aad filan karto:

- **Horay u sii qorshayso:** Wadahadalada ku saabsan qorsheynta raritaanada waxay bilaabmi doonaan dhawaan, si guuritaankaaga u dhaco Febraayo 2026. Fadlan ka fikir baahiyahaaga iyo dookhyadaada gurigaaga cusub, si aad waxyaabahaas noola wadaagto.
- **Diyaargarowga:** Waqti xaadirkan, waad is diiwaangelin kartaa si aad u hesho ballan fool-ka-fool ah oo aad uga hadli karto tallaabooyinka xiga iyo sida ugu wanaagsan ee aan kuu taageeri karno.
- **Taageero kugu habboon:** Kooxdayada raritaanada ayaa ku taageeri doona si aad u heshid guri waafaqsan baahiyahaaga, ayna guuristaada uga dhigaan mid sahlan oo u qabsoonta sida ugu macquulsan. Waxaan diyaarin doonaa oo aanu bixin doonaa kharashka raritaanka sidoo kalena anaga ayaa tuuri doona wax kasta oo aadan rabin inaad ula guurto gurigaaga cusub.
- **Nagu xirnow:** Waanu kula socodsiin doonaa howlaha qorsheynta ee guryaha dib loo dhisayo.
- **Soo noqoshada:** Dib-u-horumarintu waxay qaadan doontaa inta u dhaxaysa 6 iyo 8 sano. Waxaad xaq u leedahay inaad ku noqoto xaafada aad hadda degan tahay marka dib u dhisku dhamaado iyadoo lagu salaynayo xaq u yeelashadaada, baahiyahaaga iyo ku haboonaanta guryaha cusub. Waxa kale oo aad dooran kartaa inaad degto gurigaaga cusub haddii taasi kugu habboon tahay, wakhtigaas ayada ah.

## Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawino

Waxaan fahamsanahay in guuritaanku uu keeno isbedel weyn, waxaanan halkan u joognaa inaan kaa taageerno tallaabo kasta oo aad qaadeyso. Waxaad ballamahaaga guurista usoo kaxaysan kartaa qof ku caawiya. Tani waxay noqon kartaa:

- Saaxiib ama xubin qoys
- Wakiil ka socda Ururka Kiraystayaasha Dadweynaha Victoria ama Kiraystayaasha Victoria (Victorian Public Tenants Association or Tenants Victoria)
- Sharci yaqaan ku matala oo ay ku jiraan adeegyada sharciga bulshada ama Adeegga Sharciga Aboriginal-ka Victoria.

Waxaan kuu diyaarin doonaa turjubaan haddii aad u baahan tahay, marka aad go'aansato waqtiga aad la hadli doonto kooxdayada dib-u-dejinta.

Homes Victoria waxaa ka go'an inay raritaankaaga ka dhigto mid sahlan oo u qabsooma sida ugu macquulsan, waxaana halkaan u joognaa inaan kaa caawinno tallaabo kasta.

Salaan diiran



**Dannii de Kretser**

*Maamulaha ku meel gaadhka ah,  
Homes Victoria*

